



Waxa soo socda: Bandhiga farshaxanka ee HeART of Portland, oo ah dabaaldegii 150^{aad}, bandhiga ilaha waxbarashada gaarka ah

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u dabaaldegi doonaan guulaha ay gaareen ardaydiisa farshaxaniistayaasha ah iyo dadka wax soo bandhigaya ee dhacdada HeART of Portland ee Abriil 16-27 ka dhacaysa Madxafka Farshaxanka ee Portland. Dhacdadu oo ah bandhiga sanadlaha ah ee PPS ee waxbarashada farshaxanka waxaa suurtagaliyay Canshuurta farshaxanka ee Portland.

Dhacdadu waxay ku bilaabmaysaa soo dhaweynta furitaanka oo Talaadada, Abriil 16, laga bilaabo 6:30-8:30 habeenimo ka dhacaysa madxafka Kridel Grand Ballroom. Soo dhaweynta waxaa lagu soo bandhi doonaa ficilo kala duwan oo ka socda farshaxaniistayaasha degmada oo wax soo bandhigaya oo uu la socdo cod iyo qalabka muusikada, qoob ka ciyaar iyo bandhig masraxeedka ay qabanayaan arday ka kala socota dhammaan heerarka dugsi.

Waxa la soo bandhigayo waxaa lagu dhex dari doonaa hadalo ay soo jeedinayaan afar qof oo goobta ka hadlaysa: Brian Ferriso, oo ah Agaasimaha Golaha Fulinta Madxafka; Greg Archuleta, oo ah farshaxanka ka tirsan qabiilka Hindida Chinook isla markaana ah macallinka Hindida Maraykanka; Chloe Eudaly, oo ah Guddoomiyaha Magaalada Portland; iyo Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud ee PPS.

Soo dhaweynta waxay ku bilaabmaysaa soo bandhigista 80 qaybood oo ah farshaxan muuqaal ah – sawirrada farshaxanka, sawirrada la qaado, farsamooyinka dhanka farshaxanka iyo kuwo dheeraad ah. Bandhigu wuxuu socon doontaa ilaa Sabtida, Abriil 27, marka ay maalinta xiritaanka dhacdada isku soo beegmaan munaasabada bilaha ah ee Miller Family Free Day. Soo gelitaanku a wuxuu noqon doonaa mid lacag la'aan ah laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo, iyada oo ardayda PPS ay wax soo bandhigi doonaan maalinta oo dhan.

Waxaa sidoo kale jiri doona waayo-aragnimada dhanka farshaxan sameynta oo gacmaha laga qabanayo “Flags of Hope,” kuwaasi oo dhammaantood lagu martiqaaday in ay sameeyaan calan dhar ka sameysan oo matalaya waxa qof kastaa ku rajo weyn yahay adduunka ee ay tahay in lagu daro waxyaabaha laga wada shaqeeyay ee la soo ururiyay ee isla hadaba la hayo ee dhan 400 calan iyada oo waqtiga gu’ga lagu soo bandhigi doono xafiiska degmada.

Farshaxanka ardaydu wuxuu ahaa xudunta waxyaabihii xayaysiinta u ahaa iyada oo la adeegsanayo tartanka sameynta sawirrada weyn ‘poster’ ee degmada oo dhan. Waxaa ku guuleysatay Gabriela Morejohn oo ka tirsan Dugsiga Hoose ee Markham, oo ka hoos shaqeynaysay Huber si loo sameeyo sawir farshaxaneed si loogu isticmaalo in uu noqdo sawirka weyn ee guud.

Saddex arday oo kale ayaa shaqadoodii gaartay in laga dhigo kaararka 'postcards'. Sophia Spehar, oo shaqada u haysay Dugsiga Dhexe ee West Sylvan kana hoos shaqeynaysay Anne Larsen, ayaa kaalinta labaad gashay. Laba arday oo la shaqeynayay macallinka Dugsiga Hoose ee Beach ee Carlos Baca ayaa kaalinta saddexaad wada galay: Carolina Alonso iyo Harlow Kleffner. ([Fiiri kaararkooda 'postcards'](#))

Munaasabadda sanad-guurada ah Lincoln: Dabaaldega sanadka oo dhan soconaya ee sanad-guuradii 150-aad ee Dugsiga Sare ee Lincoln wuxuu halkii u sarreeyay gaari doonaa Sabtida iyada oo Xaflad Weyn "Big Party" ay ka dhacayso Jaamacadda Gobolka Oregon Garoonkeeda Viking Pavilion.

Dhacdada, oo bilaabmayso 5 galabnimo, waa iskugu imaan doona ardaydii hore u qalin jebisay, macallimiintii iyo maamulayaashii hore iyo kuwa hadda iyo xubnaha qoyska, waxaana lagu soo bandhigi doonaa cunto iyo madadaalo ka socota ardayda hadda iyo kuwii hore.

Tikidhada iyo macluumaadka dheeraadka ah waxaa laga helayaa [website-ka Friends of Lincoln](#), halkaasi oo waxyaabaha la xiriira dhacdada, oo ay ku jiraan buste lagu xusaayo sanad-guurada iyo buug-sanadeedyada dugsiga oo jira 150 sano, la helayo in la gato.

Bandhiga ilaha waxbarashada gaarka ah: Oo ah bandhig ay tahay in uu ka caawiyo in ardayda waxbarashada gaarka ah u diyaar garoobaan nolosha dugsiga sare ka dib ayaa la qaban doonaa Talaadada, Abriil 23, isaga oo ka dhacaya Dugsiga Sare ee Roosevelt. Bandhiga Ilaha Kala guurka ee Waxbarashada Gaarka ahi waa mid u furan dadka oo dhan, wuxuuna socon doonaa laga bilaabo 6 ilaa 8 habeenimo.

Bandhiga waxaa lagu soo bandhigi shirkaddo kala duwan 'vendors' oo takhasus u leh caawinta ardayda waxbarashada gaarka ah, oo ay ku jiraan Barnaamijka Isbedelka Dhallinyarada 'Youth Transition Program', Impact NW, TriMet Ridewise, Jaamacadda Gobolka Portland qaybteeda Ka fikir Kulliyad 'Portland State University's Think College', Xuquuqda Naafada Oregon 'Disability Rights Oregon', Job Core, iyo Adeega Naafanimada Korriinka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bandhiga, Kia Swain kala xiriir kswain@pps.net.